

## **Dhammaan waxyaalaha nagu saabsan**



### **Adeega Kalkaalinta**

### **Degmada ee Boqortooyada**

### **(Royal District Nursing Service)**

waxay ku siisa daryeel

kalkaalineed dadka guryahooda

24 kii saac maalintii, maalin kasta

oo ka mid ah sanadka.

### **Waxaa ka mid adeegayaga:**

- Daryeelka dadka waa weyn
- Daryeelka guud ee kalkaalinta
- Daryeel khaas ah oo loogu talagalay dadka qaba sonkorta, HIV/AIDS, kansarka naaska, nabarada iyo wax intaas ka sii badan
- Daryeelka dadka isbitaalka ka soo baxay ee guriga yimaada
- Daryeelka dadka jiran
- Shaqada bulshada & duugista dabiiciga ah

### **Adeega Turjubaanka**

Haddii aadan fahmin Ingiriiska waxaa laguu qabanayaa turjubaan soo raaca kalkaalisada. Turjubaanku waa bilaash.

### **Yaa isticmaali kara adeega?**

Adeegayaga waxaa isticmaali kara dhammaan dadka oo dhan iyadoon loo eegaynin qofka dakhligiisa lacageed, diintiisa, ama dhaqankiisa. Shuruuda keliya waxay tahay inaad baahi dhab ah u qabto daryeelka kalkaaliye iyo inaan helayno adeega si aan u u fulino baahidaada.

### **Sidii aad noola soo xirriiri lahayd?**

Haddii aadan ku hadlin Ingiriis ka tag taleefankaaga iyo afka aad ku hadasho - **oo Ingiriis ah** - waana ku soo waceynaa anagoo turjubaan haysana, dakhtarkaaga, isbitaalka amase adeeg kale ayaa nala soo xirriiri kara.

### **Go'aammo la xiriira xannaanadaada**

Haddii aad dhibaato kala kulantid go'aan qaadashada xannaanadaada, xuquuqda iyo mas'uuliyadaha ama wixii aad jeceshahay, qof aad ku kalsoontahay ayaad taageero weydiisan kartaa. Qofkani (kuu hadli kara) awood uma laha inuu go'aammo kuu gaaro, laakiin adiga ayuu kuu hadlayaa si uu u hubiyo xuquuqdaada. Qofkaas wuxuu kula ahaan karaa qaraabo, saaxiib, sheikh ama daris.

Haddii loo baahdo, qof kuu dooda ayaa laguu magacaabi karaa si uu go'aan uga gaaro wixii lagaaga baahdo. Macluumaad intaas dheer kala xiriir kal-kaaliyaha caafimaadka.

### **Kharash intee le'eg ayuu igu kacayaa?**

Booqashada koowaad kalkaalisada ayaa kuu sheegi doonta kharashka adeegayaga, isagoo ku saleysan heerka dakhligaaga.

### **Haddii aad ku faraxsan tahay adeegayaga fadlan u sheeg kalkaalisadaada!**

Haddii aadan ku faraxsanayn adeegayaga, marka hore u sheeg kalkaalisadaada ama maamulaha xarunta. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Sarkaalka Cabashooyinka **9536 5266** ama Guddoomiyaha Adeega Caafimaadka **(03) 8601 5200** ama **1800 136 066**.

## All about us



**Royal District  
Nursing Service**  
provides nursing care  
for people in their  
homes 24 hours a day,  
every day of the year.

### **Our services include:**

- Care for older people
- General nursing care
- Special nursing care for people with diabetes, HIV/AIDS, breast cancer, wounds and more
- Care for those home from hospital
- Care for terminally ill people
- Social work & physiotherapy

### **Interpreter service**

If you do not understand English an interpreter can be organised to visit with the nurse. The interpreting is free of charge.

### **Who can use the service?**

Our service is available to all people regardless of income level, religion or cultural background. The only requirements are that you have a genuine need for nursing care and that we have the services to meet your need.

### **How to contact us?**

If you do not speak English leave your telephone number and the name of the language that you speak - in English - and we will ring you back with an interpreter. Your doctor, hospital or other service can also contact us.

### **Decisions about your care**

If you have any problems making decisions about your care, rights and responsibilities, or interests you can ask a person who you trust to support you. This person (informal advocate) has no legal power to make decisions for you but can speak on your behalf and ensure your rights are upheld. This person may be a family member or friend, a religious leader, a neighbour.

If required, a formal advocate can be appointed to make legally binding decisions on your behalf.

For more information about this speak to your nurse.

### **How much does it cost?**

During the first visit the nurse will tell you about the cost of our service, based on your level of income.

### **If you are happy with our service please tell your nurse!**

If you are not happy with our service, first tell your nurse or Centre Manager. You can also call our Complaints Officer on **9536 5266** or the Health Services Commissioner **(03) 8601 5200** or **1800 136 066**.